Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran

DUGSIYADA DADWAYNAHA EE EE STAINT PAUL

2008-09	TUSAHA WAALIDIINTA
Taariikha Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran (ESY Dates) June 20-July 22 2009	Xaafiiska Adeega Tacliinta Gaarka ah Office of Special Education Service

Waa maxay adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran (ESY)?

Adeegyada Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran (ESY) waa adeeg si shakhsi ah wax loogu dhigayo ardayda xaqa u leh ee naafada ah si ka badan sanad dugsiyeedka caadiga ah. Kooxda Qorsahaha Tacliinta Shakhsiga ah (IEP) ayaa waxay adeegyadaan ku salaynayaa baahida gaarka ah ee shakhsiga. Waxaan idiin haynaa adeegyo badan; laga bilaabo Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran ee loogu talagalay ardayda tacliinta gaarka ah qaadata ilaa iyo barnaamijyada caadiga ah ee aan tacliinta gaarka ah ahayn. Baahida tacliinta Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran ee ardayda naafada ah waa in habsanadle ah loo eegaa.

Waa maxay ujeedada Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran (ESY)?

Ujeedada Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran (ESY)ee loogu talagalay caruurta barnaamijka tacliinta gaar ah dhigata waa in laga hortago dib-u-dhac xun oo wayn oo ku yimaada ama ku dhaca mid

ama laba ka mid ah xirfadaha qofku bartay oo aanu dib u hanan Karin ama u xasuusan karin wakhti macquul ah, oo aan ka badnayn sideed asbuuc.

Yaa Qiimaynaya in Qofka naafada ahi u baahanyahay Adeegyada ESY iyo in kale?

Kooxda Qorsahaha Tacliinta ee Shakhsiga ah (IEP)ayaa go'aamindoona in uu cunugaagu la tacaalayo dib u dhac wayn AMA inuu si macquul ah u muujiyo dib u dhac wayn oo laga filayo inuu si wayn uga dib dhaco hal ama in ka badan oo ah maadooyinka xirfad ahaan lagama maarmaanka u ah ardayga. Kooxda Qorsahaha Tacliinta ee Shakhsiga ah (IEP) ayaa go'aan ka gaaraysa adeega ardayga ku haboon ee qaadanayo inta lagu jiro ESY. Kooxda Qorsahaha Tacliinta ee Shakhsiga ah (IEP) ayaa dib u eegaysa dukumentiga ardayga ee dib u dhaca muujinaya si ay u go'aamiyaan hadafka ama ujeedada ardaygu dib u dhaca wayn uu kala kulmay. Adeega ESY ee ardayga la siinayo ama inta jeer ee loogu celinayaa adeegaan waxay ku xirantahay hadafka ama goolka ardayga loo dooray.

Regression: hoos u dhac dhinaca tacliinta ah oo qofka ku yimaada marka uu mudo iskuulka moogaado

Recoupment: awooda uu qofku dib ugu soo ceshen karo aqoontii uu lahaa intii ka horaysay intii aan iskuulka la xirin.

Self sufficiency: Waa khalkhal adeega dhexgala oo halis ku noqda in qofku barto xirfado nolosha lagama maarmaan u ah taasoo caawinaysa awooda qofku u leeyahay inuu iskiis u shaqaysto iyadoo intii suurtagal ah uu ka maarmayo cidii cawinaysay ama hay'adaha caawimaada bixiya.

Sideebaa Kooxda Qorsahaha Tacliinta ee Shakhsiga ah (IEP) ay go’aan uga gaaraan in ardayga naafada ahi uu adeega ESY u baahanyahay iyo in kale?

Kooxda Qorsahaha Tacliinta ee Shakhsiga ah (IEP) waxay tixgalinaysaa haddii hilmaanshaha xirfadihii qofka naafada ahi bartay oo markaa keeni kara dhacdooyinka soo socda:

1. Meelaynta aad ayaa loo xadadidoonaa
2. Waa inay ardayga ka muuqataa inuu si wayn u halmaamay xirfadihii uu bartay taasoo lagama maarmaan ka dhigaysaa in ardaygu hormar wanaagsan ka sameeyo manahajka wayn.
3. Waa inay ardayga ka muuqataa inuu si wayn u luminayo isku filaanshaha nafitiisa iyo siyaabaha uu asagu isku caawin karayo taasoo lagu caydayn karayo xadiga tira ahaan si toos ah shaqaaluhu u fidiyeen ardaygaas iyo/ama inta uu le’egyahay wakhtiga uu ardaygu u baahanyahay inuu helo tacliinta gaarka ah ama adeegyada kale ee laxiriira.
4. Ardayga waa inay ka muuqataa inuu lumiyey xirfadihii uu bulshada dhexdeeda si xor ah wax uga baran lahaa ama uu si xor ah bay’ad aan tacliin lahayn ugu nool yahay taasoo ay keentay hilmaanka uu ku lumiyey xirfadihii nolosha.
5. Waa inuu ardaygu meel uu ka raaco waayo fursadaha dadka shaqada ay ka shaqeeyaan lafteeda lagu tababaro amaba uu shaqo wax tar ah waayo taasina ay ugu wacantahay ardayga oo hilmaamaya xirfadiihii loogu talagalay.

Haddii cunuga naafada ahi uu adeega looyaqaan ESY qaato hal xagaa ma uu qaadandoonaa xiliga xagaaga ee ku xiga?

Su’aashaa jawaabteedu waa Maya. Ka qayb galka uu ardaygu hal sano ka qayb galay adeega loo yaqaan ESY khasab kama dhigayso inuu araygu sanadka ku xigana qaato. Go’aanka lagu xaqiijinayo inuu ardaygu adeega ESY waxaa si sanadle ah uga baaraandega Kooxda Qorsahaha Tacliinta Shakhsiga ah (IEP).

Si Aan u Caawiyo, Akhbaar noocee ah ayaan siin karaa Kooxda Qorsahaha Tacliinta Shakhsiga ah (IEP) Wakhtiga ay Go’aamada Gaarayaan

Waxaad samayn kartaa inaad nagu caawiso macluumaadka cunugaaga ku saabsan ee la xiriira dhinaca kartida iyo awooda uu u leeyahay inuu xirfadihii ama tacliintii uu bartay xasuusnaado inta lagu jiro wakhtiga dheer ee iskuulku xiranyahay. Tusaale ahaan:

1. Intee in le’eg oo tacliintii uu yaqaanay ah ayuu cunugaagu xasuusan karayey markii xagaagii la soo dhaafay dugsigu xiraa.
2. Saamayn intee le’eg ayey xasuusta cunugaaga ku leeyihiin marka fasax ee iskuulku xiran yahay iyo maalmaha weekend-ga loo yaqaan.
3. Wakhti intee dheer le’eg ayey badanaa ku qaadataa cunugaaga inuu dib u soo xasuusto tacliintii ama xirfaddii uu himaamay intii uu iskuulka moogaa?

Adeega Sanad Dugsiyeedka Dhamaystiran

Xaafiiska Adeega Tacliinta Gaarka ah

360 Colborne Street St Paul, Minnesota 55102

Haddii aad hayso wax su'aal ah oo ESY ku saabsan, fadlan waxaad soo wacdaa 651.767.8321

Ama waxaad booqataa boggayaga interneetka ee ah:

http://www.specialed.spps.org

Maamulaha

Meria Crstarphen, Ed.D.

Gudoomiya Waxabarashada Degamada

Valeria Silva

Gudoomiyaha Waxbarashada

Cecelia Dodge

Director-ka Tacliinta Gaarka ah

Xubnaha Gudoonka Waxbarashada

Kazoua Kong_thao, Chair

Elona Street_Stewart, Vice Chair

Tom Conlon, Clerk

Tom Gold stein Treasurer

John Brodrick, Director

Anne Carrol, Director

Keith Hardy, Director